



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WAR-SAXAAFAFEED 015/2009

Ergayga Gaarka ah (SRSG) oo ku baaqay in ay si guul leh u dhaqan galaan waxyaabiyii ka soo baxay Shirkii Brussels ee Soomaalia

Nayroobi, 27Abril 2009 - Ergaygga Gaarka ah ee Qarammadda Midoobay uqaabilsan Arrimaha Soomaalia, Ahmedou Ould-Abdallah, ayaa ku amaanay Bulshada caalamka sida deeqsinimada leh ee ay ugu balanqaadeen lacag Gaaraysa US\$ 213 Milyan Hay'addaha Arrimaha Nebedgelyadda u Qaabilsan Soomaalaya iyo Howlgalka Ururka Midowga Afrika ee Soomaliya (AMISOM). Sidoo kale, waxaa uu sheegay in si dhakhso leh loo helo dhaqaalihii la balan qaaday loona isticmaalo si maangal ah oo ay mas'uuliyadi ku dheehantahay.

“ Shirkii caalamiga ahaa ee ka dhacay maalintii Khamiista aheyd Brussels, ayna ka soo qaybgaleen madaxda Qaramadda Midoobay, Ururka Midowga Africa, Ururka Midowga Yurub iyo kan Ergadda Reer Yuruba, Ururka Midowga Carabta, iyo Ururka Islaamaka Addunka, waa in uu astaan u noqdaa in xaaladda Soomaalia uu isbedel ku yimid. Mar haddii la xoojinayo hay'adaha nebedgelyada, shaqana loo abuurayo dhalinyarada, kaalmada bani'aadinimo ee muhiimka ahna la gaarsiinayo ummadda, nabad waarta iyo xasiloonaaba waxay dalka ugu soo noqonaysaa si tartiib-tartiib ah iyadoo la adeegsnaayo sida ku cad heshiiskii Jabuuti.

“ Waxaa mahadleh heshiiskii Jabuuti, maxaa yeelay dadkii barakacay ayaa guryahoodii ku soo noqonaaya, barlamaanku waa loo waa dhan yahay, dawlad midnimo Qaran leh ayaa la sameeyey, waxaana si habsami leh oo kala horeysa dalka uga baxay ciidamadda Ethiopia muddo sadex bilood laga joogo.

“ Madaxdii dalka ka carartay sanadkii 2006 ayaa soo noqotay, aniguna waxaan ku guubaabinayaa madaxdani inay si nabadi ku dheehan tahay oo waxtar leh uga qeyb qaataan dib u soo nooleynta wadankooda ”.

Mudane Ould-Abdalla wuxuu xasuusiyey shaqsiyaadka Soomaalida ah ee ku jira liiska cunaqabataynta Golaha Amaanka waa inay muujiyaan wadaniyad aad u weyn horeyna u socdaan waana inaynan wadankooda madax furasho u haysanin iyagoo fiirsanaya danahooda gaarka ah keliya.

Wixii war dheeraad ah fadlan la xiriir: Susannah Price / Donna Cusumano,
Public Information Officers, UN Political Office for Somalia (Nairobi, Kenya)
Tel: +254 20 762 7132 / 7133 or +254 733902020 / 737400133

Fadlan booqo: www.UN-Somalia.org

“Haddii shaqsiyaadka aan soo tilmaamay ay si waxtar leh ugu howlgalaan helitaanka nabadda iyo xasiloonaada, Ould-Abdalla wuxuu yiri “Waxaan diyaar u ahay, anigoo ah Wakiilka Xoghayaha Guud ee Qaramada Midooway inaan baadi goobo taageerada bulshada caalamka si si guul leh aan wax uga qabto xaaladaha sharci iyo diblomacynimo ee shaqsiyaadka aan soo sheegay”

“Hadda waxaan joognaa waqtigii dadka Soomaaliyed ay dadkooda, dadka gobolka iyo bulshada caalamkaba u miijin lahaayeen inay markaan dhab ka tahay inay nabad helaan ayna iska iloowayaan dhaqankii ku dhisnaa ninkii guuleysta ayaa wax walba qaata iyo samaysashada isbahaysiyada isbedbedala markasta kuwaasoo ilaa iyo haddana dalka arimahiisa sii xumaynaya, waxaa hadda la joogaa waqtigii dhamaan dhinacyada oo dhan ay taageri lahaayeen guusha la gaaray si wadajir ahna loo wada howlgeli lahaa si loo xaqiijiyo in Soomaaliya ay dib ugu soo noqota sharaftii ay dunida ka mudneyd. 20kii sano ee la soo dhaafay, awood sheegasho qolana uma suurtagelinin inay awooda ku sii haysato haddana uma suurtoobayso inay qolo awood wax ku hesho”.